# Banaamijka MFIP iyo FSS ee dhibanaha rabshadaha qoyska

MFIP and FSS for Family Violence Victims

**Haddii aadan heysan nabadgelyo dagaal qoyska dhex mara dartiis la xiriir:**
**Day One Services -** wac 1(866) 223-1111 ama fariin u dir (612) 399-9995
Ama soo booqo www.dayoneservices.org ama www.MNcasa.org
**Haddii aadan heysan nabadgelyo dagaal galmoodka la xiriira dartiis wac:** 1 (800) 656-4673

## Rabshadaha Qoyska iyo Tanaasulada Rabshadaha Qoyska

Rabshadaha qoyska waa marka qof adiga kugu taxaluqaa uu:

- adiga ama ilmahaaga waxyeelo u geysto,
- kuugu hanjabo inuu waxyeelo u geysto adiga ama ilmahaaga, ama
- kuu dareensiiyo si kale inaad ugu cabsato naftaada ama ilmahaaga

Qofkaasi waxa uu noqon karaa:

- xilahaaga,
- wiil ama gabar aad saaxiib tihiin,
- qof horey aad xirir ula lahyd,
- qof aad muddo yar shukaansi iyo/ama xiriir galmo la lahayd,
- ilmahaaga, ama
- waalidkaa

Haddii ay tani jirto, waydii la taliyahaaga dhanka shaqaaleynta tanaasulka rabshadaha qoyska dhexdiisa awgii ah.

Haddii aysan iminka ku haysan wax rabshado ah oo qoyska dhexdiisa ah laakiin ay wali ku haysato saameynta dagaalkaa ama aad ka shaqeynayso siddii aad uga soo kaban lahayd, waa inaad waydiisataa la taliyahaaga dhanka shaqaaleynta tanaasulka rabshadaha qoyska dhexdiisa awgii ah.

**Tusaale ahaan:** adiga ama ilmahaaga oo la talin u hela dagaalka awgii ama aad geliso waqti tagida maxkamad dagaalka awgii.

## Sidee tanaasulka rabshadaha qoysku kuu caawimi karaa?

- Haddii aad ku jirto barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota [Minnesota Family Investment Program (MFIP)] ama Adeegyadda Xaslinta Qoyska (FSS), bilaha lagu siiyay tanaasulka rabshadaha qoyska kama tirsana 60ka bilood ee la xadiday, markaas waxaa siyaadaya caddadka bilaha aad heli kartid MFIP ama FSS.

- Tanaasulka ku yimid rabshadaha qoyska waxa loo isticmaali karaa in lagu siiyo waqti siyaada ah oo MFIP iyo FSS ah xataa ka dib marka aad wada isticmaasho 60 kaaga bilood. Si kale haddii loo sheego, haddii aad dhamaysatay 60ki bilood oo ay ku haysato dhibaatooyin la xiriira rabshado qoys, waxaad heli kartaa in aad dib ugu soo noqotid barnaamijka MFIP ama FSS.



- Waxaad tirsataa saacadaha aad ku qaadatay hawlqabadka/dhaqdhaqaaqa la xiriira amaankaaga si loogu daro qorshaha shaqaalaynta (EP). Hawlahaasi waxa ay noqon karaan sidda waxyaabaha ku darida qufulada amaanka suga gurigaaga ama la kulmidda mas'uuliyiinta iskuulka ilmahaaga si loo hubiyo inay fahamsan yihiin in aad adigu tahay qofka kaliya ee loo ogol yahay inuu qaadi karto ilmaha.

**Ogow:** Howlqabadka/dhaqdhaqaaqa adiga ama qoyskaaga u keeni kara khatar kuma jiri karaan qorshaha shaqaalaynta (EP). Tusaale ahaan, haddii qof aad horey xiriir ula lahayd uu ku ilaaleeysanayo kuuna kuu dabo galo shaqada, goobta shaqadu kolkaa waxaa dhici karta inaysan adiga meel amaan kuu ah aysan ahayn.

- Ka saamixiyadda ku salaysan rabshadaha qoysku waxaa dhici karta inay kuu ogolaadaan inaad sameyso saacado yar oo hawlo ah oo ka yar intii aad caadiyan sameyn lahayd.

- Haddii aadan jaa horey ugu jirin barnaamijka FSS, Saamixiyadda rabshadaha qoysku waxa ay kaa wareejin MFIP waxa ayna kuu wareejin FSS. FSS waa sidda MFIP ka oo kale uun, laakiin waa ay ku adag tahay la taliyeyaasha dhanka shaqaaleyntu inay ganaaxaan macmiladda FSS, waana uu ka dabasan yahay FSS ku barmaanijyada kale.

## Muxuu yahay qorshaha shaqaalaynta (EP)?

Hadii lagu siiyo MFIP ama FSS, waa in aad leedahay qorshe shaqaalayn. Qorshaha waxaa wada oo qoraya adiga iyo lataliyaha shaqaalaynta. Qorshaha shaqaalaynta wuxuu leeyahay 20-35 saacadood todobaadkii oo howlqabad ah iyadoo ku xirran da'da ilmaha kuugu yar. Dhaqdhaaqa/hawlgalka waxaa ka mid ah shaqa raadis, shaqayn, ama tababar. Fiiri xogta urursan *Qorshaha Shaqaaleynta MFIP*.

Haddii laguu tixgeliyey in lagaa daayo shuruudaha qaar rabshado qoyska dhex mara darted oo lagu daray qorshahaaga shaqaalaynta, waxaad tirsan kartaa waqtiga aad gelisay hawlaha la xiriira la xiriira amaanka. Waxaa laga yaabaa in aysan ahayn in aad samayso 20-35 saacadood todobaadkii haddii amaan kaaga wax yeelayso.

Haddii aadan samayn waxyaabaha ku jira EP, xafiiska MFIP ama kan FSS way ku xayiri karaan ama kaa jari karaan deeqda. Haddii 6 bilood oo xayiraad ku saarnaato waxaad si buuxda u waayaysaa deeqda MFIP iyo FSS. Laakiin waa ay adkaan in lagu ganaaxo haddii aad ku jirto saamixida dhibanayaasha dagaalada qoyska dhexdiisa ah dhibku ka soo gaaro.

## Sidee u heli karra in tanaasulka rabshado qoys la iigu daro qorshaha shaqaalaynta (EP)?

- U sheeg lataliyahaaga shaqaalaynta in aad u baahantahay tanaasulka rabshadaha qoyska.
- Raadso u doode qoysaska rabshado haysto (hoos ka fiiri).
- La taliyaha shaqaalayntu waa in uu ballan kuu qabtaa, la taliyaha shaqaalaynta iyo u doodaha qoysaska rabshaduhu haystaan waa in ay wada qoraan qorshaha shaqaalaynta iyo tanaasulka qoysaska rabshaduhu haystaan.



## Sidee u heli karaa u doode?

La taliyaha shaqaalaynta waa in uu kuu diraa u doode kaa caawima sidii aad u qoran lahayd tanaasul rabshado qoys. Laakiin waa ay adkaan in lagu ganaaxo haddii aad ku jirto saamixida dhibanayaasha dagaalada qoyska dhexdiisa ah dhibku ka soo gaaro. Haddii aad hore u lahayd u doodaha rabshadaha guriga/gudaha ama sharci yaqaan ah la taliye sharci ah oo aad rabto in ay kula shaqeeyaan, iyaguba way noqon karaan u doode haaga. Adigaa khiyaar u leh ma aha shaqada la taliya shaqaaleynta.

Xayiraad laguma saari karo inta aad ka helayso u doode, u sheeg la taliyaha shaqaalaynta sida ugu dhaqsa badan. Si aad u hesho la taliye wac 1-(866) 223-1111.


## Maxaa geli kara galka qorshaha shaqaalaynta (EP)/tanaasulka rabshadaha qoyska?

La taliyaha shaqaalaynta wuxuu foomka uu hayo ku dari karaa qorshaha shaqaalaynta si aad u hesho tanaasul. Foomku waxaa ku xusan waxyaabaha lagaa doonayo sida sida in aad telefoon haysatid mar kasta si aad wacdo u doodaha rabshadaha qoyska. Ma aha in hawl kasta aad ku qorto foomka, waxaad ku dari kartaa waxa aad rabto oo kale. Qorshe kasta waa ka duwan yahay kan kale. La taliyaha shaqaalayntu kuguma khasbi karo in aad samayso wax kasta oo adiga ama u doodahaaga aad u malaynaysaan in amaan darro ku jirto. Haddii la taliyaha shaqaalayntu isku dayo in aad samayso waxyaabo aad adiga ama u doodahaagu u malaynaysaan in nabad gelyo xumo ku jirto, racfaan ka qaado isla markiiba lana hadal gargaare sharci yaqaan. Waxa aad ka heli kartaa halkan
1(877) 696-6529.

## Waxyaabahan waa in la xasuusto:

- Haddii in aadan shaqayn amaankaaga oo aad u cabsaneyso darted xilligan, ma aha in aad shaqayso. Sababaha waxaa ka mid ah, marka aad shaqada aado waa lagu dabagelayaa, ama qof baa kugu kalifay in aad shaqadii hore ka tagto.
- Haddii welwel amaan darro kugu jirto, waxaad shaqayn kartaa saacado ka yar inta caadiga ah ee qorshaha shaqaalayntu kaa rabto. Sida haddii aad rabto in aad caruurtaad ka soo qaaddo ama gayso dugsiga, ama waxaa ku haysta waxayaabo badan shucuurtaada kicin kara, ama arrimo xagga sharciga ah aan kuu ogolayn in aad shaqayso saacado caadi ah.

- Adiga iyo qoyskaaga ma aadi kartaan melaha tala bixinta, ama daaweyn wadareed dabiici ah, ama dhakhtar cilmi nafsi ah oo ka mid ah waxyaabaha laguu siiyay tanaasulka rabshadaha qoyska. Laakiin haddi aad rabto in aad samayso waxyaabahaas oo aad ku darsatid saacadahaaga hawl qabadka, waad samayn kartaa. Haddii hawlahaas aad doorato in aad ku dartid qorshahaaga shaqaalaynta waa in aad heshaa xanaanada caruurta inta aad ka qayb qaadaneyso hawlahaas.



- La taliyaha shaqaalayntu kuguma khasbi karo in aad qaadatid amarka kala badbaadinta ama amarka faduul ka cararka, in aad maxkamad ka markhaati furtid, aad wacdid booliska, ama aad la shaqaysid qaybaha sharci fulinta. Adiga keliya aayaa goosan kara in waxyaabahaasi amaankaaga waxba yeeli karrin. Markale, hadddii aad rabtid in aad samayso waxyaabahaas oo dhan, waa in aad heshaa xanaanada caruurta.

## Maxaa dhici kara haddii aanan fulin qorshaha shaqaalaynta/ tanaasulka rabshadaha qoyska?

Haddii ay jiraan waxyaabo ku jira qorshaha shaqaalaynta oo aadan hadda u baahnayn, ama haddii xaalkaaga wax iska bedeleen, wac taakuleeyaha qoyska rabshadahu ka dhex jiraan ama la taliyaha shaqaaleynta markiiba. Adiga, la taliyaha shaqaalaynta iyo u doodahaaga waad shiri kartaan in aad wax ka bedeshaan qorshahaaga shaqaalaynta. Haddii aadan fulin qorshaha shaqaalaynta (ay ku jirto hawlaha amaankaaga), oo aadan haysan wax sabab macquul ah, waxaa lagu saarayaa xayiraad.  Kolkaa MIFP ama FSS kaaga waxaana bilaabanaya tirsiga 60ka bilood ee la xadiday. Waxaa aad muhiim u ah in isbedel la sameeyo isla markiiba, si aan arrintaasi u dhicin. Tanaasulka rabshdaha qoyska waxay inta badan dhamaadaan 3 bilood ka dib. Waxa aad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso markaa haddii aad rabto inuu sii jiro. Waxaad u baahantahay u doode markasta oo aad bedesho ama aad cusboonaysiiso qorshaha.

## Maxaan yeelayaa haddii aanan ku raacsaneyn waxayaabo ay degmadu samaysay?

La taliyahaaga shaqada ma aha ee waa taakuleeyahaaga rabshadaha qoyska cidda leh go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan in hawli ay amaan kuu tahay adiga iyo in kale. Haddii aadan ku raacsanayn go'aamadda uu gaaro taakuleeyahaagu ama la taliyahaaga shaqaaleyntu, markiiba racfaan qaado kana soo wac xafiiska dhanka sharciga (legal aid) si laguu caawiyo khadka ah 1-(877) 696-6529. Fiiri xogta urursan [Racfaan U Qaadashada DHS](#).

***Xog UrurDsan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**